Waxaa la cusboonaysiiyay
Oktoobar 2025

# Tilmaamaha Ka faa'iidaysiga

## Canshuurta Iibka ee

### Barnaamijka Neighborhood

SAINT PAUL
MINNESOTA

## Ka faa'iidaysiga Canshuurta Iibka Barnaamijka Neighborhood (STAR)

Waad ku mahadsantahay sida aad u danaynayso Barnaamijka Neighborhood STAR.

Haddii aad tahay muwaadin kujira, qof soo codsanaya barnaamijka ama saaxiib guulaystay oo uu Neighborhood leeyahay, dadaalkaaga iyo ka qaybqaadashadaaduba waxay muhiim u yihiin barnaamijka.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Neighborhood STAR, iyo sidoo kale macluumaadka codsiga, fadlan booqo **stpaul.gov/nstar**.

Haddii aad qabto wax su'aal ama faallo ah, fadlan haka labalabayn inaad la xiriirto shaqaalaha Magaalada:

**Erin Lewis**
651-266-6634
erin.lewis@stpaul.gov

**Faallooyinka ama su'aalaha qoraalka ah waxaa lagu soo diri karaa:**
Neighborhood STAR Program
25 West Fourth Street
Suite 1300
Saint Paul, Minnesota 55102

**Ama iimaylka:**
PED-NeighborhoodStar@stpaul.gov

# TUSMADA MAWDUUCYADA


| | | |
|---|---|---|
| **QAYBTA 1AAD:** | **Tafaasiisha Barnaamijka** | **Bogogga 4–5** |
| **QAYBTA 2AAD:** | **U qalmitaanka** | **Bogogga 5–7** |
| **QAYBTA 3AAD:** | **Codsiga** | **Bogogga 7–8** |
| **QAYBTA 4AAD:** | **Qiimeynta iyo Xulashada** | **Bogogga 8–9** |
| **QAYBTA 5AAD:** | **Shuruudaha Maalgalinta Waafajinta** | **Bogogga 9–10** |
| **QAYBTA 6AAD:** | **Abaalmarinada iyo Fulinta** | **Bogogga 10–11** |
| **QAYBTA 7AAD:** | **Barnaamijka STAR ee Sannadka oo Dhan** | **Bogogga 11–12** |
| **QAYBTA 8AAD:** | **Kormeerka iyo Warbixinada Mashruuca** | **Bogga 12** |
| **LIFAAQYADA:** | **Ereyada la soo gaabiyay iyo Qeexitaanadooda** | **Bogogga 13–14** |

# QAYBTA 1AAD: Tafaasiisha Barnaamijka

## Ujeedada

Sharciyo heer gobol iyo heer deegaan ah ayaa lasoo diyaariyay sanadkii 1993 si halkii santiba barkiis oo dakhliga canshuurta iibka magaalada ah loogu qoondeeyo Ka faa'iidaysiga Canshuurta Iibka Barnaamijka Neighborhood (STAR). Waxaa maamusha Waaxda Qorshaynta iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Magaalada (PED), Neighborhood STAR waxay bixisaa deeq maalgalin ah oo $5,000 ama ka badan ah oo lacag ah oo lagu bixinayo mashaariicda horumarinta ah ee xoojinaya awoodda xaafadaha magaaladeena. Qaybha Dowliga ah, gaarka loo leeyahay, aan faa'iido doonka ahayn, ama faa'iido doonka ah ee ku yaala gudaha ama ganacsiga ku haysta gudaha Saint Paul ayaa codsan kara maalgalinta STAR. Haddii aad doorato inaad codsato aadna u baahantahay adeeg tarjumaad ah oo hanaanka codsiga ah, fadlan la xiriir shaqaalaha STAR si ay kuu caawiyaan.

## Maalgelinta

Maalgalinta diyaarka ah ee barnaamijku waa ay kala duwantahay sannadba sannad waxaana go'aamiya miisaaniyadda sannadlaha ah ee STAR, taasoo uu soojeediyo Duqa magaaladu inay qayb ka tahay hanaanka miisaaniyadda Magaalada waxaana meelmariya Gollaha Deegaanka. Qoondada waxaa lagu salaeeyaa iskudarka qiyaasta dakhliga kasoo xarooda canshuurta iibka, daymaha soo xaroonaya, mashaariicda soo dhamaaday iyo dakhliga kasoo xarooda maalgashiga. Wadarta guud ee cadadka diyaarka ah waxaa dadka lala wadaagayaa marka codsiga barnaamijku furmo.

## Codsashada maalgalinta STAR

Maalgalinta Neighborhood STAR waxaa lagu bixiyaa hanaan codsi oo tartan loo galayo sannadkiiba hal mar. Marka maalgalinta la helo, Barnaamijka STAR ee Sannadka oo dhan wuxuu fursado maalgalin ah siinayaa hindiseyaasha sida degdega ah wax u raba aanna gaari karin mudada barnaamijku soconaayo. Wixii tafaasiil ah, fadlan ka daalaco webseedka STAR: www.stpaul.gov/star.

## Siyaasadaha iyo Filashooyinka Guud

- Soojeedinada STAR waa inay ahaadaan mashaariic horumarinta dhaqaalaha ah ama barnaamijyo ku yaala gudaha magaalada Saint Paul. Malagalinta STAR waxaa kaliya oo loo adeegsan karaa horumarin waligeed jiraysa oo ah mid dhisme, muuqata ("kal iyo mooye") taasoo horumarinaysa oo/ama hagaajinaysa xaafadaha Saint Paul. Mashaariicda waxaa kamid noqon kara kuwa dhaqaale iyo/ama dayactirka guryaha, mashaariicda jardiinada, mashaariicda hagaajinta wadooyinka, hagaajinta goobaha/ilaalinta goobaha ee hal-abuurka leh, iyo hawlaha horumarinta dhaqaalaha ee la filayo inay sii jiraan todoba sanno ama ka badan.

- Mashaariicda iyo barnaamijyada lagu maalgaliyo maalgalinta STAR waxaa laga filayaa in loo isticmaalo ujeedooyinka lagu maalgaliyay muddo todobo (7) sanno ah ama kasii badan. Haddii sabab walba oo ay tahayba hindisaha maalgalinta STAR la joojiyo ama guriga la iibiyo intaan todobada sanno dhammaan, abaalmarinta STAR waxaa loo baahan yahay in magaalada lagu soo celiyo.

- Si loo helo isticmaalka ugu badan ee maalgalinta STAR, codsiyada ka badan $50,000 waa in la waafajiyaa xisaabta doolar ka doolar ee ka imaanaya ilaha aan kuwa magaalada ahayn. Maalgalinada la baxsho waxaa la qaybiyaa marka ay soo dhamaadaan Hawlaha maaliyadda lana meelmariyo.

- Mashaariicda STAR waa inay noqdaan kuwo xoojinaya ujeedooyinka bulshada ayagoo ilaalinaya ama kordhinaya baaxadda canshuuraha; abuuraya oo/ama sii haynaya shaqooyinka; ka faa'iidaysanaya goobaha ganacsiga ee banaan; hagaajinaya wax ka qabashada cimilada, waaritaanka, ama adkaysiga si waafaqsan Qorshaha Wax ka qabashada Cimilada iyo Adkaysiga ee Saint Paul; taageeraya oo/ama xoojinaya kaladuwanaanshaha dhaqamada ee magaalada; ama sare u qaadaya sinaanta Saint Paul, taasoo lagu qeexo hubinta in fursadaha waxbarashada, shaqada, guryaha, caafimaadka, iyo nabadgalyadu noqdaan kuwo si siman loo qaybsado; in dhammaan dadka deegaanku ay si wakhtiyaysan oo ku haboon u helaan adeegyada, ilaha, caawimaada, iyo fursadda, iyo qolada, jinsiga, rabitaanka nooca galmada, luuqadda, isirka, wadanka uu qofku kasoo jeedo, naafanimada, da'da, ama furaha deegaanka aysan go'aamin ama ka hor istaagin qofna fursadda ka faa'iidaysiga awoodiisa.

- Hawlaha lasoo jeediyay waa inay ahaadaan kuwo waafaqsan qorsheyaasha xaafadaha ama hindisooyinka la meelmariyay.

- Dadka ka faa'iidaysanaya deeqdu waa inay u hogaansamaan shuruucda xaquuqda bulshada ee heer gobol, heer federaal,

heer magaalo iyo heer ismaamul ayna hubiyaan inuusan takoor ka dhex dhicin barnaamijyada iyo adeegyada hela maalgalinta Magaalada.

- Dadka abaalmarinta la siiyay waa inay ku jiraan qandaraaska mid kamid ah abaalmarinada STAR ee shaqeeya kahor intaysan codsan abaalmarin kale oo STAR ah.

- Soojeedintaada waxaa loo eegayaa shuruudaha u hogaansamidda taasoo ku xiran wadarta cadadka abaalmarintaada, wadra cadadka mashruuca, iyo/ama nooca mashruuca. Shuruudaha soo socda ee u hogaansamidda ee farta jiifta ku qoran waxaad ka arki kartaa webseedka Saint Paul stpaul.gov/index.aspx?NID=3710 si ay kaaga caawiso go'aaminta inay khuseeyaan mashruucaaga, waxaana dhamaanba shuruudaha u hogaansamidda lagala hadli doonaa qof kasta oo lagu abaalmariyo haddii mashruucaaga abaalmarin la siiyo. Haddii aadan haysan interneet, fadlan la xiriir shaqaalaha kor ku xusan si aad uga codsato macluumaadka u hogaansamidda:
    - *Talaabada Xaqiijinta*
    - Kabista Ganacsiga
    - *Mushaarka Ugu badan/Shuruudaha Federaalka ee Davis Bacon*
    - *Mushaarka Nolosha*
    - Heshiiska Shaqaalaha Mashruuca
    - *Qaybta 3aad*
    - PED/HRA Hindisaha Waaritaanka
    - Siyaasadda Waarta ee Dhismeyaasha Saint Paul
    - Siyaasadda Labada Dalab
    - *Barnaamijka Xiriirka Adeegbixiyaha*

# QAYBTA 2AAD: U qalmitaanka

## Codsadeyaasha u Qalma

- Qaybaha dadweynaha, aan faa'iido doonka ahayn, iyo kuwa faa'iido doonka ah ee ku yaala ama ku ganacsada gudaha Magaalada Saint Paul

- Waaxyaha magaalada iyo dhinacyada dowladdu waa codsadeyaal u qalma markay iskaashanayaan xaafadaha iyo/ama koox bulshada kamid ah.

- Kaniisadaha iyo ururada diimaha ayaa xaq u leh inay codsadaan markay la kaashanayaan xaafadaha iyo/ama koox bulshada kamid ah waana kaliya marka mashruucu yahay mid: (i) aan koox diimeed gaar ah khusayn ujeedadiisa koowaadna aysan saamaynayn oo aysan horumarinayn aysanna curyaaminayn wax diin ah; (ii) samaynaya horumarinta dhaqaalaha asagoo qabanaya shaqooyin la xiriira Hawlaha kaniisadu maalgaliso ama nooc diimeed ah; iyo (iii) u furan diyaarna u ah bulshada guud ahaab mar walba.

## Codsadeyaasha aan u Qalmin

- Xisbiyada siyaasadda iyo kooxaha siyaasadda ka shaqeeya.

- Hay'adaha iyo waaxyaha heer federaal, gobol iyo ismaamul.

- Mulkiileyaasha guryaha, dhismeyaasha, ama mulkiileyaasha guryaha magaalada iyo/ama ururada ayaga matalaya.

## Mashaariicda iyo Hawlaha u Qalma Maalgalinta STAR

Hawlaha u qalma waxaa kamid ah:

- Dayactirka, dib u hagaajinta iyo/ama dhismaha dhismeyaasha ganacsiga, deegaanka, ama warshadaha. Horumarinta goobaha deegaanka ah waxaa soo galaya kaliya mashaariicda guryaha ee gaarka loo leeyahay ama aan faa'iido doonka

ahayn; dayactirka guryaha shakhsiyaadka uma qalmaan maalgalinta STAR.

- Inta badan hagaajinta gudaha iyo dibadda dhismeyaasha ganacsiga ama kuwa deegaanka oo ay ku jiraan darbiyada, saqafyada, sagxadda, nalalka, daaqadaha, albaabada, iridaha, korontada, tuubooyinka.
- HVAC, hagaajinta tamarta iyo amaanka, adeegsiga dadka naafada ah, iyo sixitaanada qaabka dhismaha.
- Hagaajinta yaryar ee goobaha bulshada (*hagaajinta ballaaran ee goobaha bulshada waa in loo tixraacaa Hanaanka Kor u qaadista Miisaaniyadda magaalada (CIB)*.
- Qurxinta baraxadaha dadweynaha ama kuwa gaarka loo leeyahay, oo ay kujiraan dhirta iyo geedaha, jardiinada roobka, kuraasta lagu fariisto, qalabka lagu ciyaaro, baarkinka baasakiilka, iyo nalaynta kuwaas oo goobta gaar u ah cimrigooduna gaarayo 7+ sanno. Diyaarinta goobaha / ilaalinta goobaha ee hal-abuurka leh ee Hawlaha horumarinta magaalada, oo ay kujiraan farshaxanka bulshada iyo hagaajinta dhismeyaasha dadweynaha, khaasatan kuwa waxtarka u leh kala duwanaanshaha dhaqamada.
- Ururada aan faa'iido doonka ahayn ee xaafadaha ee barnaamij maalgalin ah siiya ganacsiyada maxaliga ah, mulkiileyaasha guryaha, ama dhismeyaasha/mulkiileyaasha guryaha magaalada ee loogu talagalay Hawlaha horumarinta magaalada.

**Hawlaha aan u qalmin:**

Guud ahaan, howl kasta oo aan ahayn mid dhisme, "kal iyo mooye" dabiici ahaan, uma qalanto maalgalinta Neighborhood STAR. Kuwa soo socda waa liiska tusaalooyinka aan buuxin qeexitaanada horumarinta magaalada:

- Hawlaha qorshaynta ama daraasada.
- Kharashaadka la xiriira diyaarinta soojeedinta STAR.
- Ganacsiyada guryaha (sida, xananaada guryaha, xaafiisyada guryaha).
- Barnaamijyada adeegyada bulshada (sida, kahortagga danbiyada, barnaamijyada kobcinta, xanaanada caruurta, iwm.).
- Iska bixinta dayn qofka lagu lahaa.
- Hagaajinta aan waarayn (sida, qalabka xaafiiska, kombuyuutarada, qlaabka guryaha, alaabada, gawaarida, nidaamyada teleefoonada, calamada, iyo astaamaha, iwm.)
- Geedaha, dhirta, cowska, ama qaybaha kale ee dhulka ee aan loogu talagalin inay goobtaas kasii jiraan muddo 7+ sanno ah (sida, geedaha sannadka noolaada, barnaamijyada qaybinta geedaha).
- Horumarinada aan loo isticmaali doonin ujeedada maalgalinta muddo todobo sanno ah ama kasii badan.
- Kharashaadka ku baxaya maamulka guud, oo ay ku jirto maamulista shaqaalaha, lacagta lagu shaqaynayo, iyo kharashaadka guud ee adeegyada.
- Mashaariicda/barnaamijyada ku yaala meel ka baxsan magaalada.
  - Mashaariicda hagaajinta ballaaran ee goobaha bulshada (hagaajinta ballaaran ee goobaha bulshadaa waa in loo tixraacaa hanaanka Horumarinta Kor u qaadista Miisaaniyada magaalada (CIB)).
- Lacagaha ku baxaya shaqaalaha mulkiilaha iyo howlgudashadooda hagaajinta dhismaha.
- Koobiyaynta barnaamij kale oo magaalada kajira.
- Kharashaadka diyaariyaha ee loogu talagalay shakhsiyaadka qaadanaya dheefta mashruuca/barnaamijka.

**Maalgalinta aan buuxin ayaa loo soojeedinayaa codsiyada kuwaas oo ay kamid yihiin Hawlaha u qalmitaan la'aanta keenaya ee kujira soojeedintooda. Magaalada St. Paul ma awooddo inay maalgaliso Hawlaha aan u qalmin xaataa haddii ganacsigaaga ama ururkaaga loo ogolaaday maalgalinta. Codsadeyaasha waxaa si adag loogu dhiirigalinayaa inay hubiyaan in dhamaanba Hawlaha ay kamidka yihiin codsigooda maalgalinta STAR ay u qalanto in la maalgaliyo iyo/ama in Hawlaha u qalmitaanka ee aan STAR ahayn ay si cad u bixinayaan ilaha kale ee maalgalintu.**

### Kharashaadka Yaryar iyo Adeegyada

Ilaa boqolkiiba labaatan (20%) oo maalgalinta STAR ah ayaa loo isticmaali karaa kharashaadka yaryar ee muhiimka u ah qabashada shaqooyinka dhismaha iyo dhameystirka mashruuca weyn, oo ay kamid tahay: adeega, tijaabinta bii'ada, kharashaadka dhanka sharciga, ogolaanshaha dhismaha, kharashaadka baarista iyo shati siinta, ama kharashaadka maamulka ee sida tooska ah ula xiriira Hawlaha STAR.

# QAYBTA 3AAD: Codsiga

### Diyaarinta Soojeedinta

Markay u diyaargaroobayaan soojeedinta STAR, codsadeyaashu waa inay ka fakaraan waxyaabaha soo socda:

- Barnaamijka Neighborhood STAR waxaa loogu talagalay in lagu maalgaliyo mashaariicda magaalada ee gaaraya $5,000 ama kasii badan kuwaas oo aan guud ahaanba lagu fulin karin ilaha malagalinta ee aan kuwa magaalada ahayn oo kaliya. Codasdeyaasha suurtagalka ah waxaa lagu dhiirigalinayaa inay la kulmaan shaqaalaha magaalada, ururada xaafadaha iyo kooxaha bulshada si ay u ogaadaan baahiyaha, una baaraan fursadaha jira si ay ula wadaagaan awooda iyo khibradda.
- Si loo hubiyo in maalgalinta loo qaybiyo si ballaaran oo magaalada oo dhan ah, suurtaga maahan in abaalmarinada STAR ka bataan $50,000.
- Codsadeyaashu waa iany raadsadaan fursadaha fulinta qorsheyaasha xaafadaha hadda kajira iyo istiraatiijiyadaha, sida qorsheyaasha goobaha yaryar.
- Codsadeyaashu waxay u baahan doonaan inay awood u yeeshaan inay muujiyaan inay leeyihiin, ama ay awood u yeelan doonaan heliaan, maamulista goobta dhismaha mashruucu ka fulayo.
- Shaqaalaha magaalada ayaa siinaya caawimaada farsamada codsadeyaasha, haddii ay codsadaan, si ay gacan uga gaysato xaqiijinta codsi buuxa oo awood leh.

### Tababarka Soojeedinta

Tababarka STAR ayaa la qaban doonaa bilowga mar walba oo ay bilaabanayso maalgalinta sannadlaha ah si loo siiyo macluumaadka barnaamijka dadka soo codsanaya. Fadlan ka eeg webseedka STAR si aad uga hubsato wakhtiyada tababar kasta oo dhacaya xili kasta.

### Shuruudaha Codsiga

- Dhammaanba codsiyada waa in lagu soo gudbiyaa onleenka ZoomGrants ayna ahaadaan kuwo buuxa waana in lagu soo gudbiyaa wakhtigii loo qabtay si looga tixgaliyo maalgalinta. Linkiga foomka codsiga Neighborhood STAR waxaa laga heli doonaa webseedka Barnaamijka Neighborhood STAR www.stpaul.gov/nstar raac tababarka sannadalaha ah ee STAR. Haddii aad u baahan tahay adeeg tarjumaad ah oo hanaanka codsiga ah, fadlan la xiriir shaqaalaha STAR si ay kuu caawiyaan.
- Codsiyada STAR waxaa looga baahanyahay macluumaadka maaliyadeed ee soo socda: canshuur celinta labadii sanno ee lasoo dhaafay ama warbixinta maaliyadda ee tafaftiran; ganacsiyada bilowga ah, waxaa lagu badali karaa qorshaha ganacsiga; miisaaniyadda mashruuca; qiyaasaha adeeg bixiyaha iyo/ama qandaraaslaha, iyo ilaha laga helayo maalgalinta gaarka ah iyo maalgalinta dheeraadka ah. Codaseyaashu waxay sidoo kale soo raacin karaan macluumaadka mashruuca waraaqda xisaab-xirka, ama warbixin howleedka oo ah lifaaqyo ikhtiyaari ah. Dhamaanba lifaaqyada la iskaga baahan yahay waa in lasoo raaciyaa marka codsiga lasoo gudbinayo si soojeedintaada loogu arko mid dhamaystiran. Soojeedinada aan dhamaystirnayn looma tixgalin doono maalgalinta
- Soojeedinada codsanaya maalgalinta STAR ee loogu talagalay amaah-hoosaadka/deeq-hoosaadka ee barnaamijka waa in lasoo raaciyaa tilmaamaha barnaamij hoosaadka oo faahfaahsan.

- Kharash $75.00 ah ayaa looga baahan yahay codsi walba oo gaaraya $15,000 ilaa $25,000, iyo kaharash $125.00 ah oo looga baahan yahay codsi walba oo ka badan $25,000. Dhamaanba kharashaadku waa kuwo aan lasoo celinayn. Markay codsadaan, koobiga codsiyadii hore ee STAR ayaa u diyaarsan dhinacyada danaynaya.

# QAYBTA 4AAD: Qiimeynta iyo Xulashada

Guddiga Neighborhood STAR ayaa ah cidda rasmiga ah ee dib u eegista ku samaynaysa soojeedinada codsanaya maalgalinta Neighborhood STAR. Muwaadiniinta Saint Paul ee dhinac walba ka jooga magaalada ee uu soojeediyay Duqa magaaladu ayna meelmariyeen Gollaha Deegaanku ayuu ka koobanyahay Guddiga Neighborhood STAR.

## Qiimeynta

Soojeedinada waxaa baari doona shaqaalaha barnaamijka STAR si loo eego u qalmitaankooda. Guddiga Neighborhood STAR wuxuu intaas kaddib dib u eegis ku samayn doonaa soojeedin walba oo u qalanta asagoo u eegaya shuruudaha soo socda. Mashruuc walba wuxuu heli karaa ugu badnaan 20 dhibcood.

| Muhiimadda | Dukumiintiyada xoojinaya | Dibcaha | Boqoleyda |
| --- | --- | --- | --- |
| **Saamaynta** | | **10** | **50%** |
| Soojeedinada wanaagsan waxay muujin doonaan qaabka mashruucu faa'iido ugu leeyahay Saint Paul ayagoo hagaajinaya himilooyinka bulshada (ka qaybqaadanaya baaxada canshuurta, abuuraya oo/ama haynaya shaqooyinka, dib u habaynaya guryaha wadooyinka saaran, hagaajinaya wax ka qbaashada cimilada*, ka qaybqaadanaya kala duwanaanshaha dhaqamada ama hagaajinaya sinaanta**) oo/ama wax ka qabanaya bulshada la aqoonsaday ama baahiyaha xaafada. | Su'aalaha codsiga 10-16 | | |
| **Kala duwanaanshaha** | | **5** | **25%** |
| Soojeedinada wanaagsan waxay faahfaahinayaan mashruuc noqon doona mid la heli karo ayna u dhanyihiin bulshada kala duwan ee deegaanka waxna ku biirinaya kala duwanaanshaha dhaqamada ee Saint Paul | Su'aalaha waraaqaha xoojinaya Codsiga 5, 6, 14 | | |
| **Awoodda** | | **5** | **25%** |
| Soojeedinada wanaagsan waxay faahfaahinayaan mashaariicda sida cad u faahfaahinaya qorshaha dhabta ah oo ay kujiraan wakhtiga u cayiman iyo taageerada dhaqaalaha; kuwaasoo muujinaya in mashruuca si guul ah loo meelmarin doono; sii jiraya 7+ sanno ayna kujirto aragtida bulshadu markii la diyaarinayay. | Dhamaanba lifaaqyada lasoo gudbiyay/codsigu wuu dhameystiranyahay Faalooyinka kasoo baxa dib u eegista gudaha Su'aalaha Codsiga 5-7, 16-19 foomka Miisaaniyadda Qiyaasta qandaraaslaha | | |
| **Wadarta** | | **20** | **100%** |

** sida ku cad Qorshaha wax ka qabashada Cimilada iyo Adkaysiga ee Saint Paul*

*** lagu qeexay xaqiijinta in fursadaha waxbarashada, shaqada, guriyaynta, caafimaadka, iyo badqabka si siman loo qaybsado; in dhamaan dadka deegaanku helaan helitaanka adeega oo ah mid wakhtiyaysan oo khuseeya, adeegyada, caawimaada, iyo fursad, iyo in isirka, nooca jinsiga, rabitaanka nooca galmada, luuqadda, qolada, wadanka uu qofku kasoo jeedo, xaalada naafanimada, da'da, ama furaha deegaanku*

*aysan go'aamin karin diidini karin ama xadidid karin fursadda qofku ku gaari karo ka faa'iidaysiga awoodihiisa.*

### Hanaanka Xulashada

Waxaa jira saddex tallaabo oo ku saabsan hanaanka dib u eegista codsiyada:

1. Guddiga Neighborhood STAR wuxuu ku samayn doonaa dib u eegis, qiimayn, wuxuuna maqaam siin doonaa soojeedin walba asagoo ku salaynaya sax ahaanshihiisa, wuxuuna liiska soojeedinada la qiimeeyay oo kala sareeya u gudbin doona Duqa magaalada iyo Gollaha Deegaanka. Guddiga Neighborhood STAR waxay xeerin doonaan faalooyinka ka imaanaya dhinacyada iyo kooxahaha kale ee danaynaya hadba sida loogu baahdo sida ururada xaafadaha, shaqaalaha PED, Guddiga Qorshaynta, Guddiga CIB iyo Waaxyaha Magaalada sida ugu haboon. Inta hanaankaanu socdo, codsadeyaasha waxaa la weydiin karaa inay macluumaad dheeraad ah siiyaan Guddiga STAR

   waxaana la weydiin karaa inay wax kabadal ku sameeyaan soojeedintooda. Ayadoo qayb ka ah soojeedintooda, codsadeyaasha u qalma waxaa la weydiin doonaa inay u yimaadaan waraysiga guddiga Neighborhood STAR. Inkastoo aysan waajib ahayn, ku guuldaraysiga imaanshaha waraysigu waxay saameyn kartaa dhibcahaaga. Dhammaanba kulamada Guddiga Neighborhood STAR, oo ay ku jiraan waraysiyada qaybta ka ah hanaankaan, waa kuwo u furan dadweynaha. Haddii aan ajandaha lagu cadayn, majirayso faalo dadweyne oo laga ogolyahay kulamadaan.

2. Duqa magaalada ayaa dib u eegis ku samayn doona soojeedinada Guddiga Neighborhood STAR wuxuuna soojeedintooda u gudbin doonaa Gollaha Deegaanka.

3. Gollaha Deegaanku, markooda, waxay dib u eegis ku samayn doonaan soojeedinada Duqa magaalada waxayna soo saari doonaan qaraar ay ku qoranyihiin liiska soojeedinada Neighborhood STAR ay maalgalinayso.

# QAYBTA 5AAD: Shuruudaha Maalgalinta Waafajinta

Codsi walba oo STAR ku saabsan oo ka badan $50,000 wuxuu u baahan yahay ugu yaraan waafajin $1 for $1 ah guud ahaanba cadadka deeqda aan ilaha deegaanka ka imaanayn. Codsiyada deeqda ee gagaraya $50,000 uma baahna waafajin.

### Qaaraanka U qalmitaanka Waafajinta

Maalgalinta waafajintu waa inay toos ula xiriirta soojeedinta codsadaha. Inkastoo maalgalinada Federaalka, Gobolka, ama Ismaamulka la isticmaali karo, haddana waxa amuhiimada la siinayaa mashaariicda waafaqsan maalgalinada gaarka ah. Codsadeyaasha waxaa lagula talinayaa inaan maalgaliyaan kharashaadka maamulista mashruuca ee tooska ah ayagoo isticmaalaya ilaha dibadad ee gaarka loo leeyahay (sida, deeqaha mu'asasooyinka, deeqaha lacagta ah) ayna helaan deeqahaan ayagoo qayb ka ah waafajinta.

Qaaraanka waafajinta u qalmitaanka waxaa kamid ah:

- Maalgalinta gaarka ah
- Deeqaha ururada iyo shirkadaha
- Qaaraanka maxaliga ah, iskaa wax u qabasada, iyo/ama shaqaalaha mutadawiciinta ah. Qaaraanka ka imaanaya dadka deegaanka iyo ganacsiyada waxaa kamid noqon kara adeegyada mashruuca lamidka ah ee gaarka ah sida: adeegyada xirfadaha, goobaha xaafiiska ah, agabyada, shaqaalaha mutadawiciinta ah, iyo iskaa wax u qabsada hagaajinta dhismeyaasha ee u dhiganta ilaa 30% cadadka waafajinta. Iskaa wax u qabsada iyo shaqalaaha mutadawiciinta ah waxaa lagu qiimaynayaa $15.00 saacadii.
- Qiimeynta shaqada ee lagu qiimaynayo cimriga horumarinta. Haddii iswafaajintu tahay qaabka Qiimeynta shaqada, majiri doonto maalgalin la siin doono ilaa laga samaynayo Qiimeynta sixitaanka kama danbaysta ah.
- Kharashaadka mashruuca ee la galay kaddib marka foomka codsiga oo buuxa lasoo gudbiyo shaqaalaha STAR waxaa loo arkayaa lacag waafajin ah.

Guddiga STAR waxaa dhici karta, in si iskood ah, usoo jeediyaan oggolaanshaha qaaraanada kale ee waafajinta ayagoo ku salaynaya xaalad walba gaarkeeda.

### Qaaraanka U qalmitaan la'aanta Waafajinta

U qalmid la'aanta qaaraanka waafajinta waxaa kamid ah:

- Wakhtiga kulanka mutadawiciinta;
- Deeqaha adeegyada la nooca ah ee codsiga STAR;
- Shaqaalaha mutadawaciinta ah, iskaa wax u qabsada ama qaaraanka kuwa la nooca ah*ka badan* 30% cadadka guud ee iswaafajinta;
- Kharashaadka Hawlaha guud ee ururka;
- Deeqaha/kharashaadka sida tooska ah aan xiriirka ula lahayn mashruuca STAR;
- Daymaha la cafin karo ee magaalada iyo/ama deeqaha;
- Horumarinada aan la xiriirin ee qaybaha guud ee mashruuca;
- Kharashaadka lagu galay hagaajinta la sameeyay kahor intaan lasoo gudbin codsiga STAR.

# QAYBTA 6AAD: Abaalmarinada iyo Fulinta

### Fulinta Barnaamijka/Mashruuca

Marka ay Duqa magaalada iyo Gollaha Deegaanku xushaan, codsadaha STAR waxaa lagu wargalin doonaa si qoraal ah balanqaadka maalgalinta. Shaqaalaha magaalada ayaa la qaadan doona kulan abaalmarinta ka horeeya si loo siiyo dib u eegista guud ee shuruucda magaalada kuwaasoo qabanaya dhamaanba Hawlaha Neighborhood STAR. Soojeedinada waxaa lagu xulanayaa ayadoo lagu salaynayo macluumaadka kujira codsiga waxaana dhici karta inaan isbadal weyn ku imaan inta lagu jiro fulinta mashruuca. Dadka helaya STAR waxaa looga digayaa inaysan samayn wax balanqaad dhaqaale ah ilaa inta shuruudaha iyo u hogaansamidda si buuxda *ay uga fahmayaan una aqbalayaan* dhinacyada oo dhan.

Dadka ku guulaysta waxay haystaan ilaa laga gaarayo sannadka dhamaadkiisa marka maalgalinta sannadlaha ah la meelmariyo si ay usoo galaan qandaraaska maalgalinta STAR una bilaabaan dhismaha howlahooda STAR. Ugu yaraan qaar kamid ah cadadka maalgalinta mashruuca STAR waa in la isticmaalaa dhamaadka sannadka xiga kaddib sannadka maalgalinta la meelmariyo, kharashaadka oo buuxa ayaana la filayaa inuu ku yimaado wakhtiga loo cayimay ee ku cad qandaraaska maalgalinta (hoos ka eeg tafaasiisha qandaraaska). Haddii lagu guuldaraysto fulinta heshiiska wakhtigii loogu talagalay waxaa ka dhalanaysa joojinta balanqaadka deeqda magaalada.

### Fulinta Qandaraaska

Kahor intaaan lala galin heshiiska rasmiga ah Magaalada Saint Paul, waxaa kulan ku saabsan u hogaansamidda dhismaha ka horeysa lala qaadan doonaa qofka helaya STAR, qandaraaslahooda iyo shaqaalaha magaalada ee muhiimka ah si la isula eego arrimaha khuseeya u hogaansamidda ee mashruuca gaarka u ah kuwaas oo ay kamid yihiin Howsha Balanqaadka; Kabista Ganacsiga; Siyaasadda waaritaanka; Siyaasadda Labada codsi; Xeerarka Shaqaalaha; Mushaarka Nolosha; Qaybta 3aad; iyo Barnaamijka La xiriirista Adeegbixiyaha. Shuruudaha khuseeya ayaa intaas kaddib lagu dari doonaa heshiiska rasmiga ah. Waxyaabaha kujira barnaamijka heshiiska deeqda Neighborhood STAR waxaa kamid ah:

- Warbixinta foomka Shaqada oo faahfaahinaya shaqada la qabanayo, halka laga helayo lacagta waafajinta (haddii ay ka badantahay $50,000), ilaha maalgalinta ee dheeraadka ah, miisaaniyadda guud ee mashruuca, iyo wakhtiga u cayiman fulintiisa;
- Shahaadada caymiska oo shaqaynaysa oo wadata caymiska hantida oo sax ah aydoo Magaalada Saint Paul ku qortay in caymis dheeraad ah la isiyay;

- Warbixinta himilada bulshada;
- Warbixinta danaha is diidan; iyo
- Lifaaqyada saxda ah ee khuseeya isticmaalka maalgalinta si loogu hogaansamo shuruucda heer federaal, gobol, iyo maxaliba.
- Kharash xiritaan oo u dhigma 1% boqolkiiba cadadka lacagta deeqda STAR ayaa la ururin doonaa kahor intaan la qaybin maalgalinta.

### Qaybinta Maalgalinta STAR

Foomamka u gaarka ah ee STAR waxaa soo saaraya shaqaalaha magaalada ee mashruuc kasta kaddib markii qandaraaska la fuliyo. Foomamkaan waxaa intaas kaddib loo isticmaali doonaa in lagu sameeyo codsiyada mashruuca. Maalgalinada STAR waxaa loo qaybin karaa oo/ama dib loogu celin karaa Hawlaha u qalma ee:

1. La bilaabay kaddib markii maalgalinta STAR ay ansixiyaan Duqa magaalada iyo Gollaha Deegaanka;
2. si sax ah loo diyaariyay qaansheegadkooda;
3. ay la socdaan dukumiintiga iswaafajinta lacagta lagu bixiyay mashruuca (haddii loo baahdo); iyo
4. helay oggolaanshaha shaqaalaha Human Rights & Equal Economic Opportunity (HREEO, Xaquuqda Aadanaha iyo Fursadda Dhaqaalaha Loo simanyahay) taasoo ah shuruudaha u hogaansamidda.
5. Diyaarinta ugu danbaysa, waxaa kamid ah cadaynta dhamaystirka mashruuca, oo ay kamid yihiin waxyaabaha laga dhaafay iyo warbixino kasta oo baaritaan ah.

Dadka ku guulaysta waa inay keenaan cadaynta lacagaha qandaraasleyaasha/adeegbixiyeyaasha 15 maalmood gudahood marka ay helaan maalgalinta STAR.

### Barnaamijyada Aan faa'iido doonka ahayn Amaah-Hoosaadka/Deeq-Hoosaadka

Waxyaabaha soo socda waxay khuseeyaan dhinacyada aan faa'iido doonka ahayn ee raadinaya maalgalinta deeqda STAR si ay ugu shaqeeyaan barnaamijka amaah-hoosaadka/deeq-hoosaadka:

- Dhinacyada aan faa'iido doonka ahayn waxaa loo ogolaan doonaa ilaa saddex sanno si loogu qaybiyo maalgalinada STAR;
- Ururada aan faa'iido doonka ahayn uma qalmaan inay codsadaan barnaamijkooda amaah-hoosaadka/deeq-hoosaadka;
- Dhinaca aan faa'iido doonka ahayn ee codsanaya lacagaha dheeraadka ah ee loogu talagalay barnaamijyo horey u jiray ama kan lamid ah waa inay baaqiga maalgalinta kasoo hartay ku isticmaalaan guud ahaanba kahor intaan maalgalinta cusub ee STAR loo qaybin;
- Codsadeyaashu waa inay muujiyaan awoodooda ay ku maamuli araan barnaamijka, oo ay kujirto qorista daynta iyo ku adeegista daynta, hadday khusayso;
- Tilmaamaha deeq-hoosaadka oo faahfaahsan waa in lagu soo daraa codsiga STAR iyo heshiiska.

# QAYBTA 7AAD: Barnaamijka STAR ee Sannadka oo Dhan

Codsiyada ka imaanaya codsadeyaasha u qalma maalgalinta deeqda STAR waxaa la aqbalayaa sannadka oo dhan, makii maalgalinta la helo, xaaladaha soo socda ayadoo loo xeerinayo:

- Codsaduhu waa inuu muujiyaa baahi cayiman oo uu u codsanayo xili ka baxsan hanaanka codsiga Neighborhood STAR sannadlaha ah;
- Dhamaanba codsiyada waxaa lagu soo gudbinayaa foomka codsiga Barnaamijka Sannadka oo dhan ah ee STAR;
- Codsiyada Sannadka oo Dhan ah waa inay taageeraan Gollaha Deegaanka iyo Duqa magaaladu.

- Ugu yaraa hal doolar oo aysan magaaladu lahayn (gaar loo leeyahay) si loo waafajiyo halkii doolar e kasta oo ay STAR leedahay ayaa looga baahanyahay dhamaanba codsiyada deeqaha ka badan $50,000;
- Maalgalinta iswaafajintu waa inay toos ula xiriirta soojeedinta codsadaha.
- Kharash $75 ah ayaa looga baahanyahay codsi walba oo gaaraya $25,000 ama ka yar iyo kharash $125.00 ah oo looga baahanyahay codsi walba oo ka badan $25,000. Dhamaanba kharashaadku waa kuwo aan lasoo celinayn.

### Hanaanka Qiimeynta Codsiga

Dib u eegista iyo kala soocista soojeedinada Sannadka oo Dhan ee Neighborhood STAR waxaa samaynaya Guddiga Neighborhood STAR ayagoo isticmaalaya aragtida (marka ay codsadaan) ururada xaafadaha, shaqaalaha PED, Guddiga Qorshaynta, Bulshooyinka CIB iyo Waaxyaha Magaalada sida ugu habboon. Talooyinka maalgalinta ee Guddiga STAR iyo kala soocista waxaa loo sii gudbinayaa Duqa magaalada iyo **Gollaha Deegaanka si ay si kama danbays ah ugu ansixiyaan. Fadlan la xiriir shaqaalaha ku qoran tilmaamahaan ama xafiiska deegaankaaga haddii aad danaynayso codsashada maalgalinta Sannadka oo Dhan ee STAR.**

# QAYBTA 8AAD: Kormeerka iyo Warbixinada Mashruuca

Dadka ku guulaysta STAR waxay keenayaan dukumiintiga kharashaadka mashruuca iyo horumarkooda ku aadan gaarista rajooyinka natiijada mashruua laga filaayo. Maamuleyaasha Mashruuca ee waaxda Qorshaynta iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa korjoogtayn doona lacag qaybinta STAR iyo shaqada iswaafajinta ee looga baahanyahay labadaba horusocodka iyo u hogaansamidda mashruuca, oo ay kujirto ururinta cadaynta lacag bixinta dhamaanba qadaraasleyaasha iyo adeeg-bixiyeyaasha.

Qiimeynta kama danbaysta ah ee mashruuc kasta si loo go'aamiyo baaxadda mashruucu noqon karo mid guulaysta ayaa loo baahan yahay in lasoo gudbiyo kahor inta aan la samayn qaybinta kama danbaysta ah ee maalgalinta STAR. Guusha mashruuca waxaa lagu cabirayaa ayadoo lala barbardhigayo natiijada mashruuca laga filayay iyo ujeedooyinka guud ee Barnaamijka Neighborhood STAR.

Marka la dhamaystiro dhamaanba Hawlaha heshiisyada, ama marka uu dhamaado wakhtiga heshiisku, baaqiga maalgalinta ee mashruuca kasoo hara waxaa loo soo celinayaa maalgalinta Neighborhood STAR.

**Warbixinta Sannadlaha ah ee Duqa magaalada iyo Gollaha Deegaanka:** Shaqaalaha magaaladu waa inuu warbixinta sannadlaha ah ee barnaamijka iyo Hawlaha maaliyadda ee Barnaamijka STAR usoo gudbiyaa Duqa magaalada iyo Gollaha Deegaanka.

**Dib u eegista Sannadlaha ah ee Muhiimadaha:** Muhiimadda isticmaalka maalgalinta canshuurta iibka waxaa dib loo eegaa sannad walba. Guddiga STAR iyo/ama shaqaalaha magaaladu waxay dib u eegi doonaan una soo gudbin doonaan faalooyinka iyo talooyinka dhinacyada danaynaya.

**Tafaftirka iyo Hubinta Tayada:** Waxay noqonaysaa mas'uuliyadda qolada la maalgaliyay inay keenaan dhamaanba dukumiintiyada muhiimka ah, sida ay magaaladu u doonayso, ujeedada go'aan ka gaarista u qalmitaanka barnaamijka iyo u hogaansamidda barnaamijka socda.

# LIFAAQYADA: Ereyada la soo gaabiyay iyo Qeexitaanadooda

## Ereyada lasoo gaabiyay

**CIB:** Capital Improvement Budget (Miisaaniyadda Hurumarinta Magaalada), waa miisaaniyadda laba sannadlaha ah ee horumarinta magaalada.

**HRA:** Housing and Redevelopment Authority (Wakaaladda Dib u hormarinta Guryaha), waa qolada sharciga u haysata ee samaysa Hawlaha dib u hormarinta ah ayagoo wakiil ka ah Magaalada Saint Paul. Xubnaha Guddiga HRA waxay sidoo kale xubin ka yihiin Gollaha Deegaanka.

**PED:** Planning and Economic Development Department (Waaxda Qorshaynta iyo Horumarinta Dhaqaalaha) waa waaxda magaalada ee mas'uulka ka ah guriyaynta iyo hindisooyinka horumarinta dhqalaaha. Shaqaalaha PED ayaa maamula barnaamijka STAR.

**STAR:** Sales Tax Revitalization Program (Barnaamijka Dib u habaynta Canshuurta Iibka).

## Qeexitaano

**Kharashaadka Maamulka:** Waa kharashaadka guud ee muhiimka u ah maamulista urur, oo ay kujiraan mushaar bixinta, goobaha xafiisyada, agabka, kirada, korontada/biyaha, iwm.

**Tafaftirka:** Baaritaanka xogaha maamulka iyo maaliyada ee ururka si loo hubiyo u hogaansanaanta xeerarka dhaqaalaha iyo barnaamijka.

**Kabista Ganacsiga:** Waa sharci heer gobol ah oo qaar kamid ah ganacsiyada hela kaalmada gobolka ama dowladda hoose ku waajibinaya inay haystaan himilo bulsho oo cad dadka kaalmada helayana ku waajibinaya inay sameeyaan hadafyo lagu gaarayo shaqo abuur, mushaaraad, iyo dheefo ku yimaada laba sanno gudahood kaddib markay kaalmada helaan.

**Horumarinta Magaalada:** Waa hagaajinta muuqata ee guryaha.

**Qandaraaska/Jeshiiska:** Waa heshiis sharci ahaan u dhaqangalaya oo u dhexeeya magaalada iyo cida qaadanaysa STAR kaasoo qeexaya qodobada, shuruudaha, waajibaadka, iyo mas'uuliyadaha dhamaanba dhinacyada.

**Diyaarinta goobaha ee Hal-abuurka leh:** Waa qaab lagu hormariyo dhaqaalaha ayadoo la isticmaalayo farshaxanka iyo dhaqanka kaasoo ay dhiirigalinayaan saaxiibada dowliga ah, kuwa gaarka ah, iyo kuwa bulshada si loo qaabeeyo hanaanka muuqaalka iyo kan bulshada ee goobta si loo dardargaliyo maalgalinta dhaqaalaha, loo dhiirigaliyo isbadalka bulshada, loona hagaajiyo bii'ada ay ka dhisantahay.

**Haynta goobaha ee Hal-abuurka leh:** Waa istiraatiijiyad lagu hormariyo dhaqaalaha taasoo taageerta awoodda bulshadu u leedahay ilaalinta goobta iyo wadajirka bulshada ayadoo la isticmaalayo xanaanayn loo iticmaalayo farshaxanka,dhaqanka, iyo qaababka kale ee halabuurka iyo dhaqaalaha leh. Istiraatiijiyaddu kaliya diiradda saari mayso diyaarinta iyo badalista muuqaalka iyo goobaha bulshada laakiin waxay ilaalisaa oo haysaa xasuusaha dhaqanka ee la xiriira dadka aaga degen.

**Kala duwanaanshaha Dhaqanka:** Waa jiritaanka kooxo dhaqan ahaan iyo isir ahaan kala duwan oo bulshada kamid ah, marka la eego Magaalada Saint Paul.

**Kharashaadka Fudud:** Waa kaharashaadka macquulka ah ee muhiimka u ah qabashada shaqada dhismaha iyo dhamaystirka mashruuca magaalada.

**Qiimeynta Ugu danbaysa:** Waa qaymayno qoraal ah oo ku saabsan guusha iyo qiimaha barnaamijka ama mashruuca la dhamaystiray. **Deeqda:**

Waa abaalmarinta maalgalinta mashruuca ama barnaamijka taasoo aan u baahnaynin dib loo bixiyo haddii shuruudo cayiman la buuxiyo. **Shaqo**

**Abuurka:** Waa shaqooyinka la balanqaaday in la abuurayo sabab la xiriirta Hawlaha STAR.

**Xeerarka Shaqaalaha:** Waa jadwalka mushaaraadka ku cad inuu yahay mid cadaalad u ah shaqaalaha dhismaha.

**Ka Dhaafista:** Waa dukumiinti ka imaanaya qandaraasle, qandaraasle hoose, qof agabka keena, qof qalabka keena ama dhinac kale ee sheeganaya inay lacag qaateen.

**Waafajin:** Waa lacagta ama adeegyada kale ee lagu balanqaaday mashruuca ama barnaamijka STAR. Deeqaha STAR ee ka badan $50,000 waxay u baahan yihiin ugu yaraan iswaafajin $1 ka $1 ah oo ka timaada ilaha aan ahayn kuwa magaalada marka deeqdu buuxdo.

**Kharashka Diyaarinta Daynta:** Waa kharash magaaladu ka qaadayso wakhtiga xisaab xirka u dhigma 1% cadadka lacagta deeqda STAR ay bixisay.

**Guddiga Qorshaynta:** Waa dadka degen Saint Paul, ee Duqa magaalada iyo Gollaha Deegaanku magacaabaan, kuwaasoo u xilsaaran samaynta talo soojeedinada

khuseeya qorshaynta dib u horumarinta iyo hagaajinta magaalada.

**Kulanka U hogaansamidda ee Dhismaha Kahoreeya:** Waa kulan la qabto oo u dhexeeya shaqaalaha magaalada iyo dhinacyada lagu abaalmariyay deeqaha STAR si loogala xaajoodo shuruudaha magaalada ee ay waajibka tahay in la buuxiyo kuwaasoo ay ku xirantahay maalgalinta magaaladu.

**Barnaamijka:** Waa shaqo maalgelintu soo mariso urur si loo gaariiyo cida isticmaalkeeda loogu talagalay.

**Mashruuc:** Waa horumarinta magaalada oo halmar ah oo lagu samaynayo dhisme gaar ah.

**Maamulista Mashruuca:** Waa howsha iskudubaridka iyo korjoogtaynta horumarinta iyo dhamaystirka mashruuca ama barnaamijka la maalgaliyay.

**Maamulaha Mashruuca:** Waa qof shaqaale ka ah PED oo loo xilsaaray inuu la shaqeeyo shakhsiyaadka kujira Hawlaha horumarinta, kormeerka, iyo maamulka ee guud ahaantood ama qayb kamid ah lagu maalgaliyo maalgalinta magaalada.

**Macluumaadka Mashruuca:** Waa qiyaasta caqligalka ah ee dakhliga iyo kharashaadka sannad kamid ah sannadaha shaqadu socoto

**Maamulista Goobta:** Waa awooda ah in qofku ku sameeyo horumarin guri goobta asagoo isticmaalaya mulkiyad, kiro mudo dheer ah ama heshiis iib oo saxiixan.

**Gancsi Yar:** Waa qolo lacagteedu ka yartahay $1 milyan iibkooda guud ama leh shaqaale joogto ah oo 20 qof ka yar.

**Qorshaha Goobta Yar:** Waa qorshe oo meelmariyay Gollaha Deegaanku oo loogu talagalay dib u habaynta ama horumarinta goob dhuleed qeexan oo magaalada ku taala.

**Warbixinta Adeegyada Shaqada/Baaxadda:** Waa tafaasiisha Hawlaha la qaban doono marka la fulinaayo mashruuca ama barnaamijka, oo ay kujiraan qofka(dadka) mas'uulka ka ah, wakhtiga u cayiman, iyo miisaaniyadda oo faahfaahsan.

Shaqo Aad Mulkiilo u Tahay**:** Waa shaqada uu qabanayo mulkiilaha dhismuhu si uu u dhamaystiro hagaajinta dhismaha ee gurigiisa. Qiimaha shaqadaan waxaa loo isticmaali karaa qayb kamid ah iswaafajinta maalgalinta STAR.